NHS London

SelfScreen

# Iska-baarida HPV ee Baaritaanka Afka Ilmo-galeenka

Hage ku qoran luuqadda caadiga ah ee Ingiriisiga oo loogu talagalay haweenka iyo dadka qaba afka ilmo-galeenka ee da'doodu u dhaxayso 25 ilaa 64



# Tusmooyinka

Qodobbada muhiimka ah 2
Iska-baaritaanka HPV ee loogu talagalay baaritaanka afka ilmo-galeenka 3
Inaad baaritaanka laftaada samaysid 4
Natiijooyinka baaritaankaaga 5
Xulashadaada 6
Isbedelada ay tahay inaad ka digtoonaato 7
Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah 7

# Qodobbada muhiimka ah

- Ku dhawaad dhammaan kansarada ku dhaca afka ilmo-galeenka waxaa sababa fayraska 'human papillomavirus' (HPV).
- Iska-baaritaanka HPV wuxuu ku lug leeyahay in dheecaan laga qaado xubinta taranka si looga baaro fayraska 'human papillomavirus' (HPV).
- Iska-baaritaanka HPV waa tijaabo loogu talagalay baaritaanka afka ilmo-galeenka.
- Waxaa la siiyaa haweenka iyo dadka qaba afka ilmo-galeenka ee si dhif iyo naadir ah uga xaadira ama aan waligoodba ka qayb gelin baaritaanka afka ilmo-galeenka.
- Waxaad iska qaadan kartaa muunadaada baaritaanka afka ilmo-galeenka adigoo tagaya xarunta GP-gaaga.
- Haweenka iyo dadka qaba afka ilmo-galeenka intooda badan ma qaadi doonaan HPV.Si kastaba ha ahaatee, haddii aan HPV ka dhex helno muunadaada, waxaad u baahan doontaa in muunad kale uu kaa qaado dhakhtar ama kalkaaliye. Sidaas waxaa loo samaynayaa si loo hubiyo inay jiraan unugyada aan caadiga ahayn ee afka ilmo-galeenka. Unugyada aan caadiga ahayn waxay isu rogi karaan kansarka afka ilmo-galeenka haddii aan la daweyn.

# Iska-baaritaanka HPV ee loogu talagalay baaritaanka afka ilmo-galeenka

## Waa maxay baaritaanka afka ilmo-galeenka?

Baaritaanka afka ilmo-galeenka wuxuu HPV ka eegayaa afka ilmo-galeenka. Tiro aad u yar oo haweenka iyo dadka qaba afka ilmo-galeenka ah, HPV wuxuu ku noqon karaa cudur halis ah wuxuuna sababi karaa kansarka ku dhaca afka ilmo-galeenka. Kani waa kansar ka bilaabma afka ilmo-galeenka. Waa cudur aad halis u ah oo aad u dhiman karto.

Inaad marto baaritaanka ayaa ka hortagi kara inuu kugu dhaco kansarka afka ilmo-galeenka. **Baaritaanka afka ilmo-galeenka wuxuu badbaadiyaa kumanaan nafood sanad walba.**




## Waa maxay HPV?

Fayraska 'Human papillomavirus' (HPV) waa fayras caam ah. Dadka intooda badan way la kulmaan fayraskan mar uun noloshooda ka mid ah. Habdhiska difaaca jirkaaga ayaa caadi ahaan ka takhalusi kara fayraska adigoon waligaa marna ogaan inaad la kulantay/qaaday fayraska. Laakiin marmarka qaarkood HPV wuxuu sababi karaa in unugyada afka ilmo-galeenka ay noqdaan kuwo aan caadi ahayn. Caadiyan, jirkaaga ayaa ka takhalusi kara unugyada aan caadiga ahayn oo afka ilmo-galeenkaaga ayaa wuxuu ku soo noqdaa sidii caadiga ahayd. Laakiin haddii tani aysan dhicin, unugyada aan caadiga ahayn waxay isu rogi  karaan oo ay noqon karaan kansar. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan HPV iyo baaritaanka afka ilmo-galeenka ka heli kartaa halkan:

**gov.uk/government/publications/cervical-screening-description-in-brief**

## Waa maxay tijaabada iska-baaritaanka HPV?

Tijaabada iska-baarida HPV waxay kuu ogolaanaysaa inaad muunad ka qaado xubintaada taranka adigoo isticmaalaya suuf/iswaab (sida suuf dheer oo cudbi ah). Waa lacag la'aan wayna fududahay in la isticmaalo.

Inta badan haweenka iyo dadka qaba afka ilmo-galeenka waxay u arkaan hannaan raaxo leh oo aan xanuun lahayn.

## Yaa la siiyaa tijaabada iska baaritaanka HPV?

Iska-baarida HPV waxaa la siiyaa dadka aan waligood, ama aan si joogto ah uga xaadirin baaritaanka afka ilmo-galeenka.

Haddii aad u qalanto inaad marto baaritaankan, kalkaalisada ama dhakhtarkaaga ayaa ku ogeysiin doona arrintaas markaad xarunta u timaado sababo kale.

# Inaad adiga samayso is-baaritaanka

Uma baahnid inaad ka walwasho inaad qaadi doonto muunad tayo fiican leh iyo in kale. Cilmi baaris ayaa muujisay in 99 ka mid ah 100-kii dumar ah ay awoodaan inay is-baaritaanka u sameeyaan si sax ah.

Xirmadaada waxaa ku jiri doona warqad-tilmaan bixineed oo si sahlan loo raaci karo iyo bandhig tallaabo-tallaabo ah oo onlayn ah oo taageero dheeraad ah lagugu siinayo.

Marka aad dhamaystirto qaadista muunadaada, xarunta GP-gaaga ayaa u diri doonta shaybaar, halkaas oo lagaga baari doona fayraska ‘human papillomavirus’ (HPV).

**Cilmi baaris ayaa muujisay in 99 ka mid ah 100-kii dumar ah ay awoodaan inay is-baaritaanka u sameeyaan si sax ah.**

## Is-baaritaanka ma u fiican yahay si la mid ah muunadda uu dhakhtarka ama kalkaalisada ka qaadaan?

Muunad uu kaa qaado dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad ayaa aad u waxtar badan. Si kastaba ha ahaatee, is-baaritaanka waa xulasho aad u wanaagsan haddii aadan rabin in muunada baaritaanka afka ilmo-galeenka uu kaa qaado dhakhtar ama kalkaaliye. Is-baaritaanka ayaa si joogta ah looga bixiyaa wadamada kale.

## Anigu ma ihi dhakhtar ama kalkaaliye – si sax ah ma isku baari karaa?

Is-baarida way ka duwan tahay baaritaanka afka ilmo-galeenka ee caadiga ah. Iswaabka/suufka dhacaan qaadista looma baahna inuu gaaro meel fog oo gudaha xubinta taranka ah. HPV waa fayras sidaas darteed wuxuu ku jiri doonaa dhammaan aagga gudaha xubintaada taranka.

## Fadlan ha isticmaalin iska-baarida HPV haddii:

- aad uur leedahay ama u malaynayso inaad uur leedahay. Waxaan kugula talineynaa inaad sugto 12 usbuuc ka dib marka ilmahaaga uu dhasho si aad u marto baaritaanka afka ilmo-galeenka.
- Xilliga caadada (caadadaada)
- aad isticmaashay daawada la dhex geliyo xubinta taranka, kiriimyo ama waxyaabaha lagu dhaqo xubinta taranka, waxyaabaha ka hortagga uurka ee la dhex geliyo xubinta taranka ama kondhomka galmada 3 maalmood ee la soo dhaafay
- aad samaysay galmo ama baaritaanka xubinta taranka ee dumarka 2 maalmood ee la soo dhaafay
- aad leedahay dhiig-bax aan caadi ahayn oo xubinta taranka ah ama xanuun miskaha ah

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, la hadal GP-gaaga ama kalkaalisadaada.

# Natiijooyinka baaritaankaaga

## Sideen ku heli karaa natiijada iska-baaritaankayga HPV?

Ka dib marka aad marto iska-baaritaankaaga HPV-ga, GP-gaaga ayaa u diri doona shaybaarka. Natiijooyinka waxaa lagugu soo diri doonaa 14 maalmood gudahood. GP-gaaga wuxuu sidoo kale heli doonaa koobiga/nugulka natiijada.

## Natiijooyinka iska-baaritaanka HPV

Waxaa jira 3 natiijooyin oo ka soo bixi kara iska-baaritaanka HPV:

### 1. HPV lama helin (HPV togan)

Inta badan haweenka iyo dadka qaba afka ilmo-galeenka waxay baaritaanka looga waayi doonaa HPV. Haddii aan HPV la helin, uma baahnid inaad wax dheeraad ah samayso. Waxaad noqonaysaa qof qaatay baaritaanka afka ilmo-galeenka. Barnaamijka Baaritaanka Afka Ilmo-galeenka ee NHS ayaa kugu casuumi doona baaritaanka xiga 3 sano gudahood haddii aad ka yar tahay 50 sano, ama 5 sano gudahood haddii aad tahay 50 sano jir ama ka weyn.

### 2. HPV la helay (HPV togan)

Haddii aan HPV ka helno muunadaada, waxaan kugula talineynaa inaad ballan u qabsato ballan baaritaanka dabagalka ah ee afka ilmo-galeenka oo uu samaynayo dhakhtar ama kalkaaliye. Haddii aad u imaan waydo, GP-gaaga ama Barnaamijka Baaritaanka Afka Ilmo-galeenka ee NHS ayaa laga yaabaa inay kula soo xiriiraan oo kuu sameeyaan casuumaad dheeraad ah.

### 3. Natiijo aan la heli karin

Haddii natiijadaada tahay mid aan ku filnayn ama aan la heli karin, waxaanu ku waydiin doonaa inaad ku celiso baaritaanka. Waxaa lagu weydiin doonaa inaad sameyso is-baaritaan kale ama in xirfadlaha daryeelka caafimaadka uu kaa qaado muunad dhammaystiran.

Baaritaanka wuxuu noqon karaa mid aan ku filnayn ama aan la heli karin sabab la xiriirta in:

- shaybaarka uusan natiijo ka heli waayo baaritaanka HPV ee muunadaada
- macluumaad uu ka maqan yahay tuubada muunada ama foomka oggolaanshaha shaybaarka
- muunada aysan soo gaarin shaybaadhka wakhtigii loogu talagalay

# Xulashadaada

## Haddii aanan rabin in aan is-baaro, sidee kale ayaan ku heli karaa baaritaanka afka ilmo-galeenka?

Waxaad xarunta GP-gaaga ka qabsan kartaa ballanta baaritaanka afka ilmo-galeenka. Baaritaanka waxaa samayn doona dhakhtar ama kalkaaliye. Rugta caafimaadka galmada ee degaankaaga ayaa sidoo kale laga yaabaa inay bixiso baaritaanka afka ilmo-galeenka. Haddii aad wax walaac ah ka qabto baaritaanka afka ilmo-galeenka waxaad la hadli kartaa GP-gaaga ama kalkaalisada caafimaadka. Haddii aad go'aansatid in xarunta GP-gaaga lagaaga baaro afka ilmo-galeenka, xasuusnoow inaad codsan karto in dhakhtar ama kalkaaliye dumar ah ay kaa qaado muunada. Adiga ayaa gacanta ku haya xakamaynta ballanta baaritaanka waxaadna codsan kartaa in la joojiyo baaritaanka wakhti kasta.

## Waa maxay faa'iidooyinka suurtagalka ah ee iska-baarida HPV ee loogu talagalay baaritaanka afka ilmo-galeenka?

Dumarka iyo dadka qaba afka ilmo-galeenka qaarkood way ku adag tahay inay ballan u qabsadaan baaritaanka afka ilmo-galeenka sababtoo ah way mashquul badan yihiin ama xarunta GP-gooda ayaa mashquul badan. Qaar baa laga yaabaa inay dhib ama ceeb u arkaan inuu dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad ka qaado muunada. Iska-baaritaanka HPV wuxuu kuu ogolaanayaa inaad adiga laftaada sameyso baaritaanka afka ilmo-galeenka.

Caddaymaha ayaa muujinaya, in qaar ka mid ah haweenka iyo dadka qaba afka ilmo-galeenka ee aan mari jirin baaritaanka joogtada ah ee afka ilmo-galeenka, kuwaas oo is-baarid isku sameeyay ayaa la ogaaday inay qabaan unugyo aan caadi ahayn oo afka ilmo-galeenka ku jira waxaana loo daaweeyay si guul leh.

## Waa maxay khataraha lagala kulmo xirmooyinka is-baarida ee baaritaanka afka ilmo-galeenka?

Waxaa jirta fursad aad u yar oo ah inuu suufku jabi karo marka aad muunada iska qaadanayso. Si kastaba ha ahaatee, tani waa wax aan u badnayn inay dhacdo marka laga reebo haddii aad xoog xad dhaaf ah saarto suufka. Qofna ma soo sheegin inay tani dhacday intii la samaynaayay daraasadihii hore. Haddii ay dhacdo in suufka uu jabo, si tartiib ah uga soo saar oo la hadal xirfadlaha daryeelkaaga caafimaad.

Haweenka iyo dadka qaba afka Ilmo-galeenka ee iska-baarid isku sameeyay intii lagu jiray daraasado hore ma aysan soo sheegin wax dhibaatooyin ah. Waxay u arkeen in baaritaanka uu yahay mid sahlan oo habboon in la sameeyo.

Waa muhiim inaad fahanto khataraha suurtagalka ah iyo faa'iidooyinka lagala kulmi karo baaritaanka afka ilmo-galeenka. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa halkan:

**gov.uk/government/collections/cervical-screening-information-leaflets**

# Isbeddellada ay tahay in laga digtoonaado

Ma jiro baaritaan 100% waxtar leh. Infekshanka HPV ayaa mararka qaarkood la seegi karaa ('natiijo taban oo been ah').

Waa muhiim inaad isla markiiba u tagto GP-gaaga haddii aad isku aragto astaamo aan caadi ahayn, gaar ahaan dhiigbax kugu dhaca inta u dhaxaysa xilliyada caadada, galmada ka dib ama ka dib caado-joogsiga, ama isbeddelo ku yimaada dheecaanka xubinta taranka.

**Waa inaad u tagtaa dhakhtarkaaga haddii aad isku aragto mid ka mid ah isbeddelladan soo socda wakhti kasta.**

- Dhiigbax ka yimaada xubintaada taranka oo aan caadi kuu ahayn, oo ay ku jiraan xilliyada aan ahayn xilliga caadada.
- Dhiigbax aad isku aragto ka dib marka caadadaada ay gabi ahaanba istaagto (ka dib xilliga caado-go'a).
- Xanuun ama dhiigbax xilliga galmada ama ka dib galmada.
- Wixii dareere ah oo aan caadi ahayn oo ka yimaada xubintaada taranka.
- Xanuun aad ka dareento dhabarkaaga hoose, inta u dhaxaysa lafaha miskahaaga (miskaha) ama calooshaada hoose.

# Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah

- Waxaad la hadli kartaa dhakhtarkaaga ama kalkaalisada.
- Waxaad la hadli kartaa qoyskaaga ama daryeelahaaga.
- Waxaad booqan kartaa websaydka NHS.UK:

**nhs.uk/tests-and-treatments/cervical-screening**